

GOBOLKA WASHINGTON  
XAFIISKA DACWAD DHAGEYSIGA MAAMULKA

Arrinka:

Lambarka Aqoonsiga Lambarka Kiiska

Magaca Racfaan-qaataha,

Nooca Racfaan-qaataha

OGEYSIISKA DACWAD DHAGEYSIGA (NOTICE OF HEARING)

Hay'adda: Waaxda Bulshada iyo Adeegyada  
Caafimaadka (Department of Social and Health Services)

Barnaamijka: Magaca Barnaamijka  
Lambarka Hay'adda

Waaxda Bulshada iyo Adeegyada Caafimaadka (Hay'adda) ama Xafiiska Dacwad Dhageysiga ee Maamulka (Office of Administrative Hearings, OAH) ayaa helay codsiga dacwad dhageysiga ee lifaaqan ku jira markey ahayd TAARIIKHDA.

**DACWAD DHAGEYSIGAAGA WAXAA LA QABAN DOONAA**

**TAARIIKHDA:** Taariikhda dacwad dhageysiga

**WAKHTIGA:** Wakhtiga dacwad dhageysiga Waqtiga Baasifigga ama isla wakhtigaas ka dib sida ugu dhakhsaha badan ee Garsooraha Sharciga Maamulka lagu heli karo.

**GOOBTA:** Wicitaanka Shirka Taleefoonka Lagu Qabanaayo (eeg tilmaamaha hoose)

Haddii adiga ama markhaati aad u baahan tihiiin TARJUMAAN, waxaanu idunku siin doonaa mid si bilaash ah. Fadlan ka wac OAH lambarka (800) 845-8830 si aad u codsato turjubaan.

Sida looga qeybqaato dacwad dhageysiga:

- Kahor inteysan dacwad dhageysigaagu bilaabmin, ka wac OAH (800) 845-8830 oo bixi nambor taleefoon halkaas oo lagaa heli karo.
- Waqtiga loo dejiyay dacwad dhageysiga, sug inta garsooraha ama wakiilka hay'adda uu kaa soo wacayo lambarka taleefanka aad bixisay.
- Xaqiiji in taleefankaagu leeyahay intarneet/khad wanaagsan, uu si buuxda jaajar u leeyahay, oo uu haysto daqiiqado kugu filan ugu yaraan saacad.
- Xaqiiji inaad joogto meel degan halkaas oo si cad wax uga maqli karto oo si cadna laguu maqli karo.
- Xaqiiji inaad damiso sifooyin kasta oo xannibaya wicitaanka.
- Haddii ay dhibaato kaa haysato qabashada wicitaanka garsooraha, ama haddii garsooruhu aanu ku soo wicin toban daqiiqo gudahood ka dib wakhtiga bilaabashada dacwad dhageysiga, isla markiiba ka wac OAH lambarka (800) 845-8830.

**Kani waa tusaale bixinaya macluumaad guud oo kaa caawinaya inaad barbar dhigto dukumeentiyada aad heshay.**

Haddii aan lagu heli karin markii lagu soo waco ama haddii aadan bixin nambor telefoon halkaas oo laga yaabo in lagugula soo xiriiro wakhtiga dacwad dhageysiga, garsooraha sharciga maamulka ayaa kugu aqoonsan kara ku fashilmida fulinta waajibaadka oo wuxuuna laalayaa racfaankaaga.

Tani waxay ka dhigan tahay **in aad waayi karto xaqa aad u leedahay dacwad dhageysi**. Xeerka Maamulka Washington (Washington Administrative Code, WAC) 388-02-0285.

Waxaad xaq u leedahay in aad la qabsato dacwad dhageysi qof ahaan loo soo xaadiraayo garsooraha. Si aad codsigan u samayso, ka wac OAH lambarkan hoos ku qoran.

Wac Wakiilka Hay'adda sida ugu dhakhsaha badan haddii aad **u baahan** tahay inaad beddesho wakhtiga ama taariikhda dacwad dhageysigaaga. Garsooraha Sharciga Maamulka ayaa go'aamin doona haddii aad haysato sabab wanaagsan si loo beddelo wakhtiga ama taariikhda.

Waxa aad ku matali kartaa naftaada dacwad dhagaysiga ama waxa aad dooran kartaa looyar ama qof kale inuu ku matalo. Adiga ayaa mas'uul ka ah kharash kasta oo uu kugu dalaco qareenkaaga.

**U sheeg OAH MARKIIBA hadii cinwaankaaga ama taleefan lambarkaaga isbeddel ku imaado.**

Waxaa laga yaabaa inaan u baahano inaan kuu soo dirno ogeysiisyo iyo boostooyin kale oo ku saabsan dacwad dhageysiga.

Haddii aad qabto naafonimo ama naafonimada xaga dareenka oo aad u baahan tahay wax sii qabanqaabin markaad isticmaalayso tas-hiilaadkayada ama adeegyadayada, fadlan la xidhiidh OAH si aad caawimo u hesho.

Fadlan akhri Soo koobidda Xuquuqda Dacwad Dhagaysiga ee ku lifaaqsan meeshan si aad wax uga ogaato xuquuqdaada, waxa ay tahay inaad keento, iyo sida dacwad dhagaysiyadu u shaqeeyaan. Waxaad ka heli kartaa macluumaadka guud ee ku saabsan habka dacwad dhagaysiga barta **[www.oah.wa.gov](http://www.oah.wa.gov)**.

Hubka fudud iyo hubka kale ee halista ah waa ka mamnuuc goobta dacwad dhageysiga iyo dhammaan xafiisyada OAH. WAC 10-20-010. Haddii aad walaac ka qabto dacwad dhageysiga ama shirka hordhaca dacwad dhageysiga, fadlan la xidhiidh OAH.

LAGU SIIYAY taariikhda boosto soo dhigista.

Maamulka Sharciga ah: **Shuruucda iyo xeerarka laga yaabo inay ku dabaqmaan kiiska**

Ku lifaaqan: Codsiga Dacwad Dhageysiga

Ku lifaaqan Soo koobidda Xuquuqda Dacwad Dhagaysiga

**SIDA LOOLA XIDHIIDHO OAH:**

Xafiiska Dacwad Dhageysiga Maamulka  
PO Box 42489, Olympia WA 98504  
Telefoonka: (800) 845-8830

**SIDA LOOLA XIDHIIDHO WAKIILKA HAY'ADDA:**

**Magaca Wakiilka Hay'adda  
Ciwaanka Wakiilka Hay'adda**

**Kani waa tusaale bixinaya macluumaad guud oo kaa caawinaya inaad barbar dhigto dukumeentiyada aad heshay.**

## SHAACINTA/CADDEEYNTA ADEEGGA (DECLARATION OF SERVICE)

Waxaan ku caddeenayaa sida hoos imaata ganaaxa been-abuurka ee hoos timaada shuruucda Gobolka Washington in maanta aan u gudbiyay dukumeentigan mid kasta oo ka mid ah dhinacyada hoos ku taxan. Waxaan koobi boostada ugu diray dhinacyada ciwaankoodu ku jiro diiwaanka anigoo isticmaalaya Adeegga Boostada ee Isku-dhafka ah, ama Boostada Mareykanka.

**Liiska qof kasta oo loo soo diray Ogeysiiskan Dacwad Dhageysiga.**

Ku taariikheysan **Taariikhda marka Ogeysiiska Dacwad Dhageysiga boostada lagu soo diray goobta Magaalada**, Washington.

(TAARIIKHDA BOOSTO KU DIRISTA)

---

Wakiilka  
Xafiiska Dacwad Dhageysiga Maamulka  
PO Box 42489, Olympia WA 98504

**Kani waa tusaale bixinaya macluumaad guud oo kaa caawinaya inaad barbar dhigto dukumeentiyada aad heshay.**

PA NOH Telephone | Reviewed 5/5/2025 | Translated 6/2025